PORTLAND PUBLIC SCHOOLS
501 N Dixon | Portland, OR 97227 | www.pps.net | pubinfo@pps.net | (503) 916-2000
Español (503) 916-3582 | Tiếng Việt (503) 916-3584 | 中文 (503) 916-3585 | Русский (503) 916-3583 | Soomaaliga (503) 916-3586

**Ku socota Dhammaan Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) Khamiista ama Jimcaha 7/15 ama 16**
**Ujeeddo: Wararkii ugu Dambeeyey ee Akadeemiyada Barashada Waxbarashada Lagu Qaadanayp Online-ka**

Bulshada iyo qoysaska Qaaliga ah ee PPS,
Waxaan idiinka mahadcelineynaa wada shaqeynta joogtada ah iyo taageerada aad na siineysaa iyada oo aan ku jirno waqtiyo aan hore inoo soo marin.
Dadaaladayada socda ee aan ku taageereyno baahiyaha ay qabaan dhammaan ardaydeenu, Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ay bixineynayaan waxbarasho dhinaca online ah oo la yiraa Akadeemiyada Barashada Online(OLA) taasi oo loogu talogalay ardayda aan iman karin waxbarashadii fasalada iskuulka lagu qaadanayey sababo caafimaad oo la xiriira dhinaca COVID-19.

Waxaa la doorbidi karaa muddo hal sanno ah in waxbarashadaasi guryaha lagu qaato. Ugu yaraan, ardayda doorata inay waxbarashadoodii ku qaataan Akadeemiyada Barashada Online waxa ay ku qaadan doonaa barnaamijkaasi hal simistar oo dhan. Akadeemiyada Barashada Online ee Dugsiyada Dadweynaha Portland lama mid ah midii aan sanad-dugsiyeedkii 2020-2021 qaabkii waxbarashada ay ardaydu ugu qaataan (CDL), iyada oo aan idin siineyno macluumaad dheeraad ah si aad xogogaal u noqotaan marka aad go'aanka qaadaneysaan.

Halkan waxaan idiinku soo gudbineynaa qaabka uu noqon doono Akadeemiyada Barashada, marka loo eego heerarka fasalada kala duwan:

- K-5: Ardaydu waxay joogta u heli doonaan waxbarasho uu u bixinayo macallin toos u soo galayo taasi oo joogta ah, iyada oo macallinka casharada bixinayaan yahay macallin aqoonsi ka sita Dugsiyadda Dadweynaha Portland. Ardaydu waxa sidoo kale ay u baahan doonaan taageerada waalidka ama daryeelaha oo ay tahay inay noqdaan macallin yare ka caawiyaan waxbarashada marka ay guriga joogaan. Macallin-yaraha guriga waxbarashada ka caawinaya ardaydu wuxuu u baahan doonaa sidii u caawin lahaa ardaydooda marka ay soo galayaan fasalada shaashada sida tooska looga qaadanayo waqtiyo gaar ah, waxa kale oo ay hubinayaan inay ardaydoodu dhammeeyeen layliyadii casharadoodii waxbarasho ee loo diray inay ka soo shaqeeyaaan, iyo inay siiyaan ardayda kale taageerada kormeerka . Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan macallin-yaraha guriga xilkiisu waxa uu ku yaalaa xagga hoose. Ardaydu waxa ay heli doonaan cuntada laga bixinayo iskuulada dariskooda iyo iyaga oo ka qeybqaadan kara hawlaha la qabto marka iskuulku dhammaado laguna qabto iskuulada dariskooda. .
- Fasalada 6-12: Ardayda heerarka fasaladani iyaga ayaa xor u ah inay hoggaanka u qabtaan siday waxbarashadooda u qaadanayaan waxaan taageeri doona macallin ka socda Dugsiyada Dadweynaha Portland. Ardaydu waxa ay heli doonaan cuntada laga bixinayo iskuulada dariskooda ku yaala iyo waliba waxa ay ka qeybqaadan karaan hawlaha lagu qabto iskuulka marka maalintii waxbarshadu dhammaato ee kala gedisan sida ciyaaraha. Waxay sidoo kale ay fursad u heli karaan inay ka qeybqaataan gargaarka xirfaadda shaqadda iyo kulliyada iyo la socoshada dhibcaha loo kaydinayo ee shuruudaha shahaadadda dibloomada,sida ay kolba ku haboon tahay.

Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS) waxa ay siin doonaan dhammaan ardayda ka diiwaangashan Akadeemiyada Barashada Online-ka addeegyo ku salaysan kooxo oo isku qoofalan, kuwaasi waxaa ka mid ah inkastoo ayna ku koobneyn tallo-siinta,gargaarka shaqaalaha bulshada, ka qeybgalka qoyska iyo gargaar u gaara ah ardayda la go'aamiyey inay leeyihiin qorshayaasha 504 ama baahiyaha waxbarasho ee gaarka ah. Waxaan sidoo kale bixineynaa addeegyada waxbarashada ESL marka ay baahida loo qabaa ay timaado.

## Shuruudaha codsiga:

Iyada oo ay kooban yihiin tirada boosasku, waxaanu mudnaanta siineynaa ardayda xaalado caafimaad leh oo ayna u saamaxayn inay iskuulka yimaadaan.

1. Waa inaad degan tahay xuduudda Dugsiyada Dadweynaha Portland ama ay yihiin kuwa ka reeban ee sida ( caruurta ku nool guryo aan guryahoodii ahayn oo lagu korinayo, caruurta u qalan McKinney-Vento sanad-dugsiyeedka 2020-21, loo oggolaaday inay dugsiyada degmada dhexdooda bedel ka qaadan karaan inay tagaan iskuulka markaa ay rabaan)
2. Waa inaad keentaan dukumenti caddeynaya in ardaygaagu aanu casharadii waxbarashadiisa ku qaadan karin fasalada iskuulka xaalado caafimaad awgood:
    a. Xaalada caafimaad #1: Caddeynta dhakhtarka in ilmahaagu ama qof kale ee guriga ilmahaaga kula nool uu leeyahay xaalad caafimaad taasi oo kordhineysa khatar caafimaad darro kaga timaado oo uu sababo xanuunka COVID-19, sida ay qeexday Hay'adda CDC.
    b. Xaalada caafimaad #2: Caddeyn shaqaalaha caafimaad xaqiijinaya in ilmahaagu u qalmo xaalado

caafimaad oo la xiriirta caafimaadka ardayga oo lagu yareyn karayo inuu waxbarashadiisa guriga ku qaato.

**Haddii aad hayso su'aalo? Waxaan kuu haynaa koox kuu diyaar ah inay kaaga jawaabaan!**
Fadlan booqo www.pps.net/contact ka dibna waxaad doorataa Akadeemiyada Barashada Online(Online Learning Academy), waxaad email u soo dirtaa onlinelearningacademy@pps.net ama waxaad soo wacdaa telelfoonkan 971-284-6969

## Maalinta kama dambeysta qabashada codsigu waa Luulyo 30,2021